



Tilmaan la raaco oo loogu talagalay Maarso 14

Qoysaska iyo shaqaalaha PPS ee qaaliga ah,

Arbacada, Maarso 14, dugsiyada ku baahsan Maraykanka ayaa ka qayb qaadan doona hawlo lagu sharfayo 17 arday iyo macallin ee lagu dilay toogashadii ballaarnayd ee ka dhacday Dugsiga Sare ee Marjory Stoneman Douglas Halkani Dugsiyada Dadweynaha Portland, Kormeeraha Guud ee Guadalupe Guerrero ayaa la wadaagay hoggaamiyeyaasha dugsiga, ardayda iyo qoysaska in uu taageerayo aqoonsiga musiibadan isla markaana dhiirigelinayo muhiimada la siinayo ardayga iyo horumarinta ku habboon hawlaha guud ee dugsiga, iyo sidoo kale casharrada fasalka iyo wadaagista ilaha ee ku saabsan mawduuca dhanka ammaanka, taageerada iyo dugsiyo loo wada dhan yahay.

Degmadu waxay heshay su'aalaha qaarkood oo ka socda waalidiinta iyo kuwo kale. Hoosta waxaa ku qoran Su'aalo iyo Jawaabo kooban si loo bixiyo jawaabo iyo caddeyn dheeraad ah oo la xiriiira tilmaamaha la raacayo Maarso 14 ee loogu talagalay PPS.

S: Miyaa la ciqaabi doonaa ardayda haddii ay baxaan?

J: Ardayda lama ciqaabi doono, laakiin waxay heli doonaan maqnaansho aan cudurdaar lahayn haddii ay tagaan meel ka baxsan dhismayaasha dugsiga. Qoysaska iyo shaqaalaha waa in ay fahmaan in ay jiraan siyaasado u gaar ah Guddiga Waxbarashada oo ku saabsan mawduuca hawlaha siyaasadeed ama socodka oo ay tahay in la raaco.

S: Maxaa dhacaya haddii waalidiintu diraan qoraal ardaygoda u oggolaaneya in uu ka qayb qaato socodka?

J: Qoraalku cudurdaar uma noqonayo in ardaygu ka qayb qaato hawlo ka baxsan dhismaha dugsiga.

S: Haddii ardaydi tagaan meel ka baxsan hantida dugsiga, shaqaaluhu ma la socon doona?

J: Iyada oo ay ku xiran hadba tirada ardayda ka qayb qaadanaysa, maamulayaashu waxaa suurtagal ah in ay shaqaalaha ka codsanaan in ay raacaan ardayda si ay caawimaad uga geystaan xaqiijinta badbaadada, laakiin ma hoggaamin karaan ama si firfircoon ugama qayb qaadan karaan socodka ka baxsan dhismaha. Hoggaamiyeyaasha PPS waxay la shaqaynayaan Xafiiska Booliiska ee Portland si ay u taageeraan walwalka dhanka ammaanka.

S: Degmadu miyay aqbalaysaa hawlaha socodka (sida isku soo ururka dhammaan dugsiga ee goobta ciyaarta ama barxadda) haddii ardaydu aysan tagin meel ka baxsan hantida dugsiga?

J: Degmadu waxay dugsiyada ku dhiirigelinaysaa in ay qabtaan dhammaan hawlaha muuqda ee dugsiga oo loogu talagalay in ay socdaan 17 daqiiqo, kaasi oo bilaabmaya qiyaastii 10 subaxnimo ama wixii hawlo kale ee waxbarasho ee lagu go'aamiyey isla markaana lagu qorsheeyey heer bulsho dugsi, iyo in la ilaaliyo siyaasadaha iyo tilmaamaha Guddigeena.

S: Macallimiintu miyay u baahan yihiin in ay sii joogaan fasalladooda, mise waxay ka tagi karaan hawlaha ay hayaan muddo ilaa 17 daqiiqo ah?

J: Dugsiyada waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay ka qayb qaataan, kuwaasi ay ku jiraan macallimiinta, iyada oo la eegayo "waayo-aragnimada ay noqon karto" ee jirta si diiradda loo saaro wada hadalka ku saabsan muhiimada uu leeyahay ammaanka dugsiyada, iyo in ardayda loo siiyo fursad ixtiraam leh si ay u muujiyaan fikirkooda shakhsi ahaaneed.

S: Maxaa dhacaya haddii ardaydu aysan rabin in ay ka qayb qaataan?

J: Doonistaasi waa la sharfi doonaa, waxaana jira qawaaniin si loo hubiyo in ay ku sii hoos jiraan kormeerka dugsiyada.

S: Macallimiinta bedel ahi ma yihiin kuwo loo tababaray tilmaamaha Maarso 14?

J: Haa, maamulayaashu waxay xaqiijinayaan in dhammaan macallimiinta bedelka ah la ogeysiyo tilmaamaha.

S: Haddii ardaydu tagaan meel ka baxsan hantida dugsiyada, booliisku caawimaad ma ka geysan doonaan xaqiijinta badbaadada?

J: Mas'uuliyiinta degmada ayaa la kulmay Taliyaha Booliiska Portland Danielle Outlaw iyo saraakiisha kale ee fulinta sharciga si looga wada hadlo tallaabooyinka dhanka ammaanka ah. Booliisku waxay samayn doonaan waxa ay awoodaan si ay jawaab uga bixiyaan socodka lagu tageyo meel ka baxsan dhismayaasha dugsiyada, laakiin ma balan qaadi karno in ardayda tagta meel ka baxsan dhismaha kor lagala socon doono.

S: Maxay hoggaamiyayaasha dugsiyada samaynayaan si ay u go'aamiyaan waxa ay noqonayaan tallaabooyinka ardayga ee la qorsheyn karo?

J: Waxaan ka codsaneynaa hoggaamiyayaasha dugsiyada in ay hubiyaan hoggaamiyayaasha ardayda isla markaana dhacdooyinka laga qorsheeyay dugsiyadooda u gudbiyaan xafiiska dhexe si macluumaadkan loo wadaagi karo degmada oo dhan.

S: Maxay waalidiintu sameyn karaan si ay u caawiyaan?

J: Fadlan mawduucan muhiimka ah kala hadal ardaydaada isla markaana fiirso farriimaha ka socda maamulaha dugsiyada. Waan ognahay sidii dhacdooyin hore in ardaydu laga yaabo in ay doortaan in ay u baxaan si shakhsi ahaan ah ama kooxo ahaan ah. Kala hadal ardaydaada sidii ay ugu sugnaan lahaayeen badbaado iyo sidii aad ula sii xiriiri lahayd.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan sida looga wada hadlo mawduucyadani, fadlan fiiri [website-kayaga](#). halkaasi oo aanu ku soo ururinay casharrada la soo jeediyey, siyaasadaha guddiga iyo tilmaamaha kale.